

# Sida loo Saxo Diiwaanada Socdaalkaaga

## Marka aad Xaliso Kadib DHS Xaqiijinta Aan-la hubin

E-Verify waxay ka koobantahay warbixin ka timid Foomka shaqaalaha I-9, Xaq u lahaanshaha Xaqiijinta Shaqada, ilaa iyo hadda oo ka timid Waaxda Guriyenynta Amniga Mareykanka iyo diiwaanada Maamulka Amniga Bulshada. Hadii warbixinta isla haato, shaqaalaha wuxuu xaq u leeyahay in uu ka shaqeeyo Mareykanka. Hadii aysan islaheyn, E-Verify waxay ogeysiineysaa badrooniga iyo shaqaalaha waxaa loo ogolaanayaa in uu ka shaqeeyo iyadoo isaga ama iyada ay xalinayaan dhibaataada.

Hadii aad hesho DHS Xaqiijin Aan-la hubin (TNC) ee E-Verify diiwanada socdaalkaaga, laga yaabo in ay qaldantahay. Diiwaanada socdaalkaaga waxay ku jirtaa xogta-keydka DHS. Iyadoo la saxayo qaladka diiwanadaada socdaalka waxay u diidi kartaa mustaqbalka DHS TNCs. Mar hadaad ku guuleysato xalinta DHS TNC waxaad heleysaa talaabooyinka xiga oo [Ogeyssintaada Talaabada Dheeraadka ah](#), waxaad dooran kartaa in aad qaadid talaabooyin dheeraad ah oo lagu saxayo diiwanada socdaalka.

## Si aad u saxdid diiwanada socdaalkaaga, isticmaal mid ka mid ah wadooyinka xiga:

**1. La xiriir adeegyada Muwadaniinta Mareykanka iyo Socdaalka (USCIS) si aad u saxdid Foomkaaga I-551, Kaarka Deganaanshaha Sharciga Joogtada ah ama Foomka I-766, Waraaqda ogolaanshaha Shaqada.**

Waxaad balansan kartaa balan wareysi qof ahaan ah oo xafiiska deegaanka USCIS ee Websaydka, [Gudbi Warbixin](#), ama soo wac Xarunta Adeega Macaamiisha Qaranka, 1-800-375-5283.

Fadlan ogow balansiga balanta waa wadada ugu dhaqsiha badan ee lagu saxo diiwaanada USCIS. Xasuuso in aad la imaatid warqadaha taageerayo heerka socdaalkaaga.

## Waa in aad ku dartaa warbixinta xigta oo gudbintaada, hadii la heli karo:

1. Sababta aad u gudbineysid codsigaada. Tusaale, "Waxaan gudbinayaa codsigaan Xeerkaan Arimaha gaarka si aan u saxo diiwaanadeyda sababtoo ah waxaan helay E-Verify TNC."
2. Koobiyada waraaqaha socdaalkaaga ama muwaadinnimadaada
3. Sharxaada warbixinta qaldan iyo sababta ay u qaldantahay
4. Soo jeedintaada bedelada ee diiwanada
5. Lambarka feelkaaga iyo magaca buuxa
6. Taariiqdaada dhalashada iyo goobta dhalashadaada
7. Saxiixaaga sharciyeynta
8. Cinwaanka boostadaada

## 9. Warbixin kale oo laga yaabo in ay ku caawiso raadinta diiwaankaaga DHS

Hadii aadan garaneynin warbixinta aad u baahantahay in laga saxo, waxaad u gudbin kartaa codsi qoraal ah si aad u heshid koobiyo ah diiwaanadaada adigoo gudbinayo [Codsiga Foomka G-639, FOIA/PA](#), ama waxaad ka heli kartaa onleenka ee [Foomka G-639](#). Foomka uma baahno in aad gudbisid codsigaada; waxaad diri kartaa warqad oo ay ku jirto warbixinta kor ku qoran. Waa in aad isticmaashaa cinwaanka kor lagu sharaxay, laakin ku calaamadeey bashqada “Codsiga Xeerka Arimaha gaarka ah” bedelkii “Xeerka Bedelka Arimaha gaarka ah.”

Fadlan fiiri [Sida loo diro Codsiga FOIA/PA](#) wixii warbixin dheeraad ah.

### **3. La xiriir USCIS ama Caadada iyo Ilaalada Xadka (CBP) si loo saxo Foomkaaga I-94, Diiwaanka Imaanshaha-Bixida.**

Hadii uu qalad ka jiro Foomkaaga I-94, oo ay sameeyeen-USCIS kala xiriir USCIS lambarka kore si aad u saxdid diiwaanka.

Hadii qaladka Foomkaaga I-94 uu dhacay marka aad gashay Mareykanka, waa in aad booqotaa Dhinaca Baaritaanka Dib u dhigista CBP, Magaalada aad ka soo Gashay, ama Meesha aad iska Diiwaangelisay in la saxo. Liiska Dhinacyada Baaritaanka Dib u dhigista ama Magaalada, fadlan booqo websaydka CBP ([www.cbp.gov](http://www.cbp.gov)) iyo riix “Magaalada” cinwaanka hoose oo bogga.

### **4. Booqo [USCIS](#) wixii warbixin oo sida loo cisbooneysiyo ama loo badelo warqada socdaalkaaga.**

### **5. La xiriir Ardayga iyo Barnaamijka Martida (SEVP).**

Hadii aad arday tahay ama marti bedel ah, aad Fullinta Socdaalka iyo Canshuurta (ICE) Barnaamijka Ardayga iyo Bedelka Martida (SEVP) Websaydka, [www.ice.gov/SEVIS](http://www.ice.gov/SEVIS). Websaydka wuxuu wataa warbixin ah sida loo cusbooneysiyo diiwaanada oo ardayda ama martida bedelka.